# WAR-MURTIYEED

**October 5, 2025**

## IS-AFGARAD AMNI OO DHEXMARAY PUNTLAND IYO DOWLADDA SOMALILAND

Masuuliyiin ka kala socda Puntland iyo Dowladda Somaliland oo ay ka mid yihiin Wasiiro, Saraakiil hay'adaha amniga labada dhinac iyo wakiilo sar sarre ayaa shir ku yeeshay **4 - 5 October 2025** Magaalada Nairobi ee Dalka Kenya. Shirka oo ahaa mid taariikhi ah ayaa masuuliyiinta labada dhinac uga wada hadleen guud ahaan xaaladda amni, dhaqaale iyo siyaasadeed ee Gobolka Geeska, gaar ahaanna masaaliixda sida gaarka ah uga dhexeeya labada dhinac. Shirku wuxuu boggaadiyey wadashaqeynta labada dhinac, gaar ahaan hay'adaha aminga iyo is-dhaafsigii maxaabiista.

Somaliland waxay ku ammaanaysaa Puntland nabadda, horumarka iyo guulaha ay ka soo hoysay la-dagaalanka argagixisada. Sidoo kale waxa ay ku boggaadinaysaa taabbagelinta nidaamka dowliga ah ee ay ka hirgalisay deegaannada Puntland.

Puntland waxay dhinaceeda soo dhaweyneysaa horumarka ay Somaliland ka gaartay Dowladnimada iyo xaqa ay u leedahay aaya katashigeeda.

**Shirka waxaa ka soo baxay:**

1. **Iskaashiga arrimaha amniga**

1) La dagaalanka Argagixisada
a) Labada dhinac ayaa ku heshiiyey in ay si wadajir ah isaga kaashadaan la dagaalanka argagixisada Al-Shabaab, Daacish iyo cidkasta oo ficilo argagixiso ka fulisa xuduudaha labada dhinac

2) Iskaashiga amniga badda (Maritime Security Cooperation)
a) Labada dhinac ayaa ku heshiiyey in ay iska kaashadaan la dagaalanka dambiyada ka dhaca biyaha badda, gaar ahaan biyaha badaha hoos yimaada masuuliyadda amni ee labada dhinac.

3) Iskaashiga hay'adaha amniga ee ladagaalanka dambiyada abaabulan
a) Labada dhinac waxay ku heshiiyeen in ay sidhow isaga kaashadaan ka hortagga iyo ka-dabatagga dambiyada abaabulan ee wax u dhimaya danaha amni iyo dhaqaale ee labada dhinac.

**2. Nabadeynta Bulshada**

Labada dhinac ayaa isku waafaqay muhiimadda ay leedahay in nabad kama dambeys ah lagu soo afjaro colaaddii ka dhacday Magaalada Ceerigaabo iyo deegaannada hoos yimaada, isla markaasna ay dadkii ka barakacay si nabad iyo kalsooni leh ugu soo laabtaan guryahooda.
Sidaa darteed:

a) Shirku wuxuu boggaadiyey gogosha nabadda ee uu dhigay Madaxweynaha Somaliland, waxaana dadka deegaanka loogu baaqay in ay si buuxda uga wada qayb galaan.
b) Sidoo kale, shirku wuxuu boggaadiyey kaalinta mugga leh ee ay Puntland ka qaadanayso qabsoomidda gogosha nabadda ee Magaalada Ceerigaabo.

**3. Xoojinta Ganacsiga iyo isu socodka Bulshada**

a) Labada dhinac waxay is la qireen muhiimadda ay leedahay in la xoojiyo iskaashiga iyo isu socodka bulshada iyo ganacsiga labada dhinac.
b) Waxaa la isla qaatay muhiimadda ay leedahay hirgalinta kaabayaal dhaqaale oo isku xira labda dhinac

**4. Siyaasadeynta Maamulka Hawada**

a) Shirku wuxuu cambaareynayaa, kana soo horjeedaa siyaasadeynta iyo ku xad gudubka badqabka duulimaadyada rayidka ah iyo isticmaalka hawada.

**Gunaanad**

1. Masuuliyiinta labada dhinac waxay isla garteen in la joogteeyo wada shaqeynta iyo kulamada wadatashiga ah ee quseeya danaha labada dhinac.
2. Shirku wuxuu soo dhaweynayaa cidkasta oo jecel nabadda iyo horumarka, rabtana in ay ka qaybqaadato daddaalada nabadda ee gobolka.
3. Shirku wuxuu boggaadinayaa daddaalada Beesha Caalamka ee taageerada nabadda, la dagaalanka ururrada Argagixisada iyo horumarinta dhaqaalaha Gobolka, labada dhinacna waxay diyaar u yihiin in ay wada shaqeyn miro dhal ah kala yeeshaan Beesha Caalamka.

**DHAMMAAD**